

## **War-murtiyeed**

### **Shir-sannadeedka Barashada Nabadda ee PDRC**

#### **21-23 September 2023**

#### **HORDHAC**

*Hay'adda Horumarinta iyo Cilmi-baarista Puntland (PDRC) waxay markii ugu horreey-say daah-furtay Shir-sannadeedka Barashada Nabadda oo lagu qabtay Garowe, caasimadda Puntland, markay taariikhdu ahayd 21kii ilaa 23kii bisha Sebtember 2023.*

*Shirka noocaan ah waa markii ugu horaysay ee lagu qabto dalka, waxaana ka soo qayb galay in ka badan 200 qof oo ka kala yimid, jaamacadaha iyo xarumaha cilmi-baarista sida Jaamacadaha, Bariga Afrika (Puntland), Muqdisho, Gaarisa, Jigjiga, Addis Ababa, Zayed (Imaaraatka), Queens (Canada) iyo hay'ado badan oo cilmibaariseed.*

*Sidoo kale waxaa iyana ka soo qayb galay qaybaha kala duwan ee bulshada, khubaro ku xeel-dheer nabadda noocyadeeda kale duwan iyo mas'uuliyiin dowladeed.*

*Shirka waxaa daah-furay Madaxweyne Ku-xigeenka Dowladda Puntland, Mudane Axmed Cilmi Cismaan.*

#### **UJEEDDADA SHIRKA**

*Hadafka shirweynahan ayaa ahaa in la kulmiyo khubarada nabadda iyo dadka ka shaqeeya, si ay u kala faa'idaystaan waayo-aragnimadooda iyo xirfadooda aqooneed.*

#### **NUXURKA SHIRKA**

*Muddadii shirku socday waxaa lagu soo bandhigay, in ka badan labaatan (20) daraasadood oo taabanaya mawduucyada iyo heerarka kala duwan ee nabadda, colaadaha iyo dhab-u-heshiinta sida:*

- *Adkaynta Nabadda.*
- *Ka hortagga iyo xallinta khilaafaadka.*
- *Fahamka sooyaalka dhab-u-heshiinta.*
- *Kaalinta haweenku ku leeyihiin nabadaynta.*
- *Iswaafajinta nidaamyada iyo qaababka nabadaynta ee diinta Islaamka, dhaqanka iyo culuunta casriga ah.*
- *Baraxtirka qaababka iyo hannaanka nabadaynta iyo dhab-u-heshiinta.*
- *Xiriirka ka dhexeeya cadaaladda ku-meelgaarka ah, nabadaynta iyo heshiinta.*
- *Is-dhexgalka Geeska Africa oo laga eegay dhankla Nabadda.*

*Waxaa kale oo shirka lagu soo bandhigay, guulo laga gaaray nabadaynta deegaanno colaado ka dhaceen iyo qaababkii tognaa ee lagu xalliyey, kuwaas oo ay ka mid ahaayeen:*

1. *Nabadayntii Gaalkacyo iyo guulihii laga gaaray (Gobolka Mudug)*
2. *Nabadayn ka dhacday qaybo ka mid ah bulshada Dhuusamareeb iyo Cadaado (Gobolka Galgaduud)*
3. *Nabadayntii Cagaaran (Magacley iyo Qoriley ee Gobolada Nugaal iyo Sool)*
4. *Nabadayntii Rako Raaxo (Gobolka Karkaar)*
5. *Nabadayntii Bandiiradley iyo Galdogob (Gobolka Mudug)*
6. *Nabadayntii Saaxmaygaag (Gobolada Soo iyo Nugaal)*

*Hay'adda PDRC ayaa soo bandhigtay cilmi-baaris (maqal iyo muuqaal) ay ka samaysay khilaafyadaha ugu waaweynaa ee ka dhacay dalkeena, khaas ahaan deegaannada Puntland.*

*Dhammaan cilmi-baaris-yadani waxay ku taliyeen in si cilmiyaysan oo joogtayn ah loogu gaaro xal-u-helid waarta.*

## **NATIJADA KA SOO BAXAY SHIRKA**

1. *Waxaa la isla qaatay in ay lagama maarmaan tahay in diiwaan iyo xog-uruurin laga sameeyo colaadihii waaweynaa ee dadka Soomaaliyeed ku habsaday kuwaas oo um-madda Soomaaliyeed kaga tagay raadad kala duwan.*
2. *In la joogteeyo Shir-sannadeedkaan loona bixiyo "Shir-sannadeedka Nabadda Soomaalida" kaas oo sannad kasta la qaban doono 20-22 Sebtember, iyadoo xoogga la saari doono mawduucyo halbowle u ah nabadda, colaada iyo heshiinta.*
3. *Sida nabadaynta Gaalkacyo laga bartay, nabadi waxa ay ku iman kartaa kuna xasili kartaa marka ay wada shaqeeyaan dhammaan qaybaha bulshada oo rag iyo dumarba leh sida dhallinyarada, odayaasha, ganacsatada, culimada, aqoonyahanka isla markaana siyaasiyiinta iyo maamulladu ka turjumaan dareenka iyo rabitaanka dadweynaha.*
4. *Sidoo kale waxa la isla gartay in ay mudan tahay xoojinta kaalinta wax-ku-oolka ah ee haweenku kaga qayb qaataan, heerarka kala duwan ee nabadaynta.*
5. *Shirku waxa uu isla qiray in ay jiraan ifafaale dib-u-noqosho iyo saansaan colaadeed, oo ka huraayo goobo kala duwan oo dalka gudihisa ah. Sidaa darteed shirku waxa uu ku baaqay in dadka Soomaaliyeed xaqiiqsadaan in qof kastaa qayb ku leeyahay xallinta dhibaatooyinka jira isla markaana loo baahan yahay in uu kaalintiisa ka qaato nabadaynta iyo heshiisiinta bulshada.*
6. *Ugu dambayntii, waxaa Shirku dadka Soomaaliyeed, khaas ahaan, deegaannada colaaduhu ka aloosan yihiin ugu baaqayaa in si dhaqso ah dhiigga iyo colaadaha loo joojiyo lana isugu yimaadda miiska wada-hadalka.*

*Ugu dambayn, Shirku waxa uu mahad ballaaran u gudbinayaa hay'adda PDRC oo suurto galisay lahaydna fikirka qabashada Shirkan oo ah midkii ugu horeeyey oo noociisa ah. Sidoo kale waxa uu Shirku mahad badan u gudbinayaa masuuliyadda iyo madaxda dowladda Puntland ee gacanta ka gaystay shirkan.*

**Dhamaad**